Houseproud kitapçık kopyası

Ku soo dhowoow Houseproud

Haddii aad u baahan tahay samays, hagaajin ama habayn gurigaaga lagu sameeyo Houseproud ayaa ku caawin kara.

Waan ognahay in himilada hawsha dhismaha guryuhu ay welwel badan tahay xataa haddii aysan jirin khatarta dhoobo iyo dhagax isa saarka ah iyo walaaca sidii kharashka hawsha loo bixin lahaa. Sidaa darteed, la yaab ma leh in dad badani ay arrintaas gabigeedaba iska illoobaan.

Houseproud waxay kuu soo gudbinaysaa hab fudud oo ammaan ah oo hawlahaas asaasiga sida ugu dhibka yar lagu qabto. Haddii dhibaatadu ay tahay helidda lacag kharashkaas lagu bixiyo, Houseproud iyana way kaa caawin kartaa.

Dayman kala duwan ayaa laga helaa Houseproud. Daymahaasi ma aha oo kaliya kuwo si dhib yar la isaga bixin karo oo haqab tiraya baahida dadka da'da wayn iyo kuwa naafoobay, ee waxay kaloo wataan dammaanad aan hantidaada lala wareegayn – wax kasta oo dhaca.

Houseproud waxaa maamula koox ka tirsan ururro 'aan faaiido doon ahayn' oo ay madax ka yihiin Dawladda Hoose ee xaafadda aad deggan tahay. Ujeeddada kaliya ee ay leeyihiin waa inay daka guryaha leh ee 60ka sano jira ama ka wayn iyo kuwa naafada ah ka taageeraan wixii samays, hagaajin ama habayn ah ooy guryohooda ku sasmaynayaan si ay guryohooda ugu sii noolaadaan iyagoo madax bannaani iyo ammaan dareensan.

Sidee ayay Houseproud u shaqaysaa?

Bilowga ilaa dhammaadka Houseproud waxay bixisaa adeeg ballaaran oo guri hagaajin ah oo si toos ah qofku ula soconayo. Waxaa laguu cayimayaa la taliyahaaga gaarka ah ee Houseproud.

Waxay kaala hadlayaan wixii samays, hagaajin ama habayn ah ood u baahan tahay. Waxay kaloo eegayaan inaad xaq u leedahay in lagu caawiyo hadday noqon lahayd nidaamkaan ama nidaam kasta oo kale.

Dawladda Hoose ayaa diyaarinaysa in la taliyuhu uu gurigaaga soo booqdo si uu u soo qiimeeyo waxyaabaha loo baahan yahay in la qabto iyo qiimaha laga yaabo inay ku kacaan. Marka lagu heshiiyo sida aad kharashka u bixinaysid Dawladda Hoose ayaa diyaarinaysa fuundi heer sare ah shaqaduna halkaas ayay ka bilaabmaysaa. Dawladda Hoose waxay kaloo diyaarinaysaa kormeer lagu sameeyo shaqada la qabtay si loo hubiyo in si hagaagsan loo hawshaas loo fuliyay.

Sidee ayaan kharashka shaqada isaga bixin karaa?

Houseproud waxay bixisaa dayman si dhib yar la isaga bixin karo oon wax halis ahi la socon, si gaar ahna loogu talagalay inay haqab tiraan baahida dadka da'da wayn iyo kuwa naafoobay.

Markaad Houseproud isticmaalaysid, qayb ka mid ah qiimaha gurigaaga ah ayaa dayn noqon kara si loo daboolo qiimaha hawsha ku baxaya. Duruuftaada gaar ahaaneed ayaa la tixgelinayaa marka la go'aaminayo nooca daynta ee kugu habboon. Xaaladaha qaarkood xataa khsab ma aha inaad daynka dib u bixisid inta aad nooshahay. Lacagata aad daynsatay oo lagu daray dulsaarka, waxaa laga jaranayaa qiimaha gurigaaga marka la iibiyo.

Markaad ogaatid inta lacag ah eed u baahan tahay inaad daynsatid ayaan kuu diyaarinaynaa dhammaan waxyaabaha aad u baahan tahay si aad dayntaas ku heshid.

Maxaa dhacaya haddii aanan dayn rabin?

Waxa dhib ahi ma jiraan. Haddii aad door bidaysid inaad kaydadkaaga kharashka hawsha isaga bixisid ama aad meel kale lacagta ka keenaysid, welise waad isticmali kartaa adeegga Houseproud adigoon dayn qaadanayn.

Daymanka la heli karaayi waa kuwee?

Saddexdaan nooc oo dayn ayaad kala dooran kartaa:

- **Daynka Raasumaalka furan (Capital release loan)**

- **Dayn Dulsaar-kaliya ah (Interest-only loan)**
- **Dayn dulsaarka iyo raasumaalkaba la bixinayo (Capital and interest repayment loan)**

Daynka Raasumaalka furan (**Capital release loan)**: Daynka noocaan ah lagaagama baahna inaad bixisid wax lacag ah oo joogto ah.

Waxaa kaliya oo daynka la bixinayaa marka gurigaagu uu farhaaga ka baxo oo la iibiyo. Marka guriga la iibiyo, tusaale ahaan, geeridaada ka dib, bankiga ama dhismaha bulshada ayaa qiimaha iibka ka jaraya lacagtii hore oo daynka (raasumaalka), oo lagu daray dhammaan wixii dulsaar fuulay. Waxa soo harayaayi waxay ku xiran yihiin sida qiimaha gurigaagu uu isu beddelay muddadaa mid la mid ah.

Hase yeeshee, haddii aad doontid iyadoon muddadaa la gaarin ayaad dib u bixinta bilaabi kartaa – marka hore dulsaarka ka dibna daynka. Sidoo kale waxaad dooran kartaa inaad bixisd daynka oo dhan iyo dulsaarka fuulay. Dib u bixinta hore ma laha wax ganaax ah, marka laga reebo sannadka koowaad gudihiisa oo laga yaabo inuu jiro kharash gaaraya ilaa laba bilood dulsaarkood.

Daynkaan waxaa sida caadiga ah loogu tagalay oo kaliya dadka kaligood nool iyo lammaanaha 75 sano gaaray ama ka wayn. Lammaanuhu waa inay sameeyaan arji wadajir ah.

ISKA HUBI IN LACAG BIXINTA NOOCAAN AHI AY BAAHIDAADA DABOOLI DOONTO HADDII AAD RABTID INAAD GURIGAAGA IIBISID AMA KA GUURTID AMA AAD RABTID IN QOYSKAAGU KAA DHAXLAAN. HADDII AAD SHAKIDID, RAADSO LA TALIYE MADAX BANNAAN.

Dayn dulsaar-kaliya ah (Interest-only loan)

Dulsaarka daynka oo kaliya ayaa bil kasta la bixin karaa. Dulsaarka ayaad bixinaysaa ilaa guriga laga iibinayo. Lacagta dhabta ah eed daynsatay (raasumaalka) isma dhimayso waxaana la bixinayaa marka gurigu uu farhaaga ka baxo oo la iibiyo.

Marka guriga la iibiyo, bankiga ama dhismaha bulshada ayaa qiimaha iibka ka jaraya lacagtii hore oo daynka - oo lagu daray wixii dulsaar haray - si daynka loogu bixiyo.

Markii aad doontid ayaad bilaabi kartaa bixinta lacagta aad daynsatay. Waa inaad bixisaa dulsaarka lacagta kugu hartay ilaa aad daynka dib isaga wada bixinaysid.

Daynka oo dhan iyo dulsaarkaba markaad doonto ayaad bixin kartaa, adigoon wax kharasha ah oo siyaado ah bixinayn, , marka laga reebo sannadka koowaad gudihiisa oo laga yaabo in bankiyada ama dhismayaasha bulshada qaarkood ay ku kordhiyaan kharash gaaraya ilaa laba bilood dulsaarkood**.**

Daynkaan waxaa loogu tagalay oo kaliya dadka kaligood nool iyo lammaanaha 60 sano gaaray ama ka wayn ama qoyska uu u joogo qof naafoobay da'duu doono ha jiree.

Dayn dulsaarka iyo raasumaalkaba la bixinayo (Capital and interest repayment loan)
Tani waa bil bixin toos ah. Dib u bixintaada bil kastaayi waxay u qaybsantaa dulsaarka iyo qayb ka tirsan lacagtii hore ood daynsatay (rasumaalka) .

Waxaad dayn bixiyaha kula heshiinaysaa dhererka muddada aad lacagta qabaysid. Muddadu markay sii yaraataba, waxaa badanaysa lacagata aad bil kasta bixinaysid, laakiin waa habka ugu dhakhsaha badan ee lacagtoo dhan la isaga bixin karo.

Doorashadaan waxaa iska leh dadka kaligood nool ama lammaanaha 60 sano gaaray ama ka wayn ama qoyska uu guriga u joogo qof naafoobay da'duu doono ha ahaadee.

Waa maxay heerka dulsaarka oo marka hore la igu xisaabiyo?

Dulsaarka guri gadasahadu waa kala duwan yahay iyadoo waqtiyada la eegayo. Siismada rasmiga ah ayaa caddaynaysa heerka dhabta ah ee kugu habboon marka hore ood qaadato. Dib ayaa lagaaga sheegayaa marka heerka dulsarku is beddelo.

Sidee ayaan u go'aansanayaa daynka igu habboon kuu noqon doono?

Annagoo doonayna inaad doorasho habboon samayso awgeed ayay Houseproud kuu soo gudbinaysaa adeeg bilaash ah oo ku saabsan Tala bixin Maaliyadeed oo Madax bannaan. Warbixintooda qoraalka ah ayaa ku tusaalaynaysa doorashada maaliyadeed ee kugu habboon.

Waxaan kaloo kugu guubaabinaynaa inaad kala hadashid doorashooyinka kuu furan xubnaha qoyskaaga iyo hadday suurogal tahay la taliyahaaga sharciga.

Waxaan warar wlaaac leh ka maqlay nidaamyo kale. Sidee baan nidaamkaan ugu kalsoonaan karaa?

Houseproud waxaa dhisay Dawladda Hoose ee xaafaddada waana hawlwadaaggeeda, ujeeddada kaliya ee ay leedahayna waa sidii ay kuugu suurto gelin lahayd inaad gurigaaga si ammaan iyo madax bannaani ah ugu sii noolaatid.

Halis ma ugu jiraa inaan gurigayga waayo?

Houseproud marna gurigaaga halis gelin mayso. Daymanka oo dhammi waxay leeyihiin dammaanad buuxda oo ah inaan gurigaaga lala wareegeyn adiga oo ku nool.

Intee le'egyahay daynka aan helayo?

Dakhligaaga iyo qiimaha gurigaaga ayaa la tixgelinayaa marka la go'aaminayao intay dhan tahay lacagta aad daynsan karto. Guud ahaan lacagtaasi waxay u dhexeysaa £3.000 ilaa 30% qiimaha imminka uu gurigaagu joogo.

Waxaan doonaynaa inaan hubinno oo kaliya, annagoo dantaada eegayna, in haddii aad go'aansatid inaad daynka dib isaga bixisid, aad iska bixisid adigoon isku dheereyn.

Caymis ma u baahan doonaa?

Haa. Haddii aad dayn qaadanaysid waa in gurigaaga dhismihiisu caynsanyahay.

Markaad gashid Daynka Raasumaalka Furan, haddii aad ka caynsan tahay shirkad ka duwan tan daynka ku siisay, waxaa dhici karta inaad sannad kasta £10 oo kharash maamul ah qaybna ka ah heshiiska siisid bankiga ama dhismaha bulshada. Daymanka kale, haddii bankiga ama dhismaha bulshadu aysan caymis kuu samayn waxay kaa qaadayaan kharash hal mar ah oo dhan £25.

Ma jiraan wax baaritaannocaafimaad ah?

Siada caadiga ah wax caddayn ah oo caafimaadkaaga ku saabsan looma baahna; hase yeeshee, ciddii 60 sano ka yar waxaan u baahanahay caddayn ah in qof naafo ahi uu qoyska ka mid yahay.

Waxaan xaq u leeyahay Deeqda Alaabada Naafada – Disabled Facilities Grant – marka ma heli karaa daynka Houseproud?

Haa. Haddii aad xaq u leedahay Deeqda Alaaabda Naafada -Disabled Facilities Grant-, Houseproud wuxuu badanaa kaa caawin karaa daboolidda wixii kharash ah oo lagaa sugayo inaad ku bixisid qiimaha hawsha laguu qabtay ama/iyo hawsha dheeraadka ah ee aan deeqdu daboolin.

Heerka da'adu waa intee?

Haddii aad qaadanaysid Dayn dulsaarka iyo raasumaalkaba la bixinayo ama Dayn Dulsaar-kaliya ah, waa inaad 60 sano ama ka wayn jirtaa ama qof naafoobay uu qoyskaaga ka mid yahay. Dadka da'da ah ee guryaha iska leh, sida badan kuwa 75 sano ama ka wayn jira Daynka Raasumaalka furan ayaa loo hayaa.

Ma jiraan wax kharash ah oo intaas ka baxsan?

Waxaa jira kharashyo lagu daboolo qiimeynta, qaanuunka iyo kharshyada maamulka. Houseproud si gaar ah ayuu gorgortan u sameysay si kharashyadaan hoos loogu dhigo. Waxaa kharshyadaan laguu sheegi doonaa ka hor inta aadan daynka qaadan – wax kharash ood bixinaysaana ma jiro inaad daynka qaadatid mooyee – daynka ayaana lagu dari karaa si aadan u isticmaalin kaydadkaaga. Si kasta arrintu ha ahaatee, kaalmo dhaqaale ayaa laga yaabaa in loo helo bixinta kharashyadaan dheeradka ah. La tailyahaaga Houseproud ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah oo arrintaas ku saabsan.

Maxay yihnn shaqooyinka ay Houseproud qaban karto?

Waa kuwaan qaar ka mid ahi:

- Musqul qubeys oo cusub
- Koronto beddelid
- Diirrimaad hal meel laga hago
- Saqaf cusub
- Beddelidda albaabada iyo daaqadaha
- Majaroor cusub
- Hagaajinta qasabadaha
- Habaynta jikada
- Hagaajinta ammaanka guriga
- Habaynno ku taageeraya haddii aad qof naafoobay guriga ku hayso.
- Hagaajinta dhaqaleynta shidaalka gurigaaga

Muxuu Houseproud bixin karaa?

- Gargaar shakhsiyan ah iyo taageero aad ka helayso La taliyahaaga Houseproud.
- Hagid xeel dheer ood ka helaysid La taliye Maaliyadeed oo Madax Bannaan .
- Adeegyada shaqaalaha farsamada, ooy ku jirto booqashooyin guri iyo jadwalka shaqada oo qiimeysan.
- Fuundiyaal fiican oo la isku halleyn karo.
- Baaritaan hagaagsan oo shaqada dhismaha lagu sameeyo. Fuundiyaasha waxay lacag helayaan oo qudha marka hawsha si wanaagsan loo qabto.

Wax badan inaad ogaatid ma doonaysaa?

Waxaad buuxisaa kaarka boostadiisa la sii bixiyay ee halkaan ku lifaaqan ama wac khadkayaga gargaarka ee bilaashka ah: **0800 783 7569** si aan kuugu soo dirno xirmo macluumaad ah oo ku saabsan Houseproud iyo cajilad la daawado (video).

Ma jiri doono codsade tixgelin hooseysa lagu siin doono dhammaan hawlaha ay Houseproud qabato iyadoo la eegayo isirka, midabka, qawmiyada ama qolada uu qofku ka soo jeedo, laba ama dheddig, xaasle ama xaas laawe, sida uu u galmoodo, da'da ama naafanimadaba.

Buugyarahaan waa in lala akhriyaa warqadda goonida ah ee la socota ee lagu faahfaahiyay heerarka dulsaarka. Qiimeyn qoran oo qiyaas ah waa la heli karaa haddii la codsado. Haddii warqadda faahfaahinta aad weydid fadlan wac telefoonka bilaashka ah: **0800 783 7569**.

Gurigaagu halis ayuu ku jiraa haddii aadan si joogto ah u bixin kharashka lagu heshiiyay ama daynka asalka ah ee uu ku caynsan yahay.